Gudbinta Go’aanadaada Xanaanada-caafimaadka (Communicating Your Healthcare Decisions)

XAQAAGA INAAD GO’AAN GAARTO

INOVA® HEALTH SYSTEM

Gudbinta Go’aanadaada Xanaanada-caafimaadka

Gudaha sanadkii 1990-ka, Kongareeska waxa uu ansaxiyay Xeerka Go’aanka-shakhsiga ee Bukaanka (Patient Self-Determination Act). Kongareesku waxuu u baahan tahay in xarumaha xanaanada-caafimaadka ay u sheegaan bukaankooda iyo dadka ku nool bulshooyinka degaankooda waxa ku saabsan xaquuqahooda iyadoo la hoos imaanayo xeerka Virginia si loo sameeyo go’aanada ku saabsan xanaanada caafimaadka. Xaquuqahan waxaa ka mid ah xaquuqda aad ku ogolaana karto ama aad ku diidi karto inaad samayso dardaaran hore ee ku saabsan xanaanadaada.

Buuggan yar waxuu ka jawaabayaa su’aalaha inta badan la is waydiiyo ee dardaaranka hore. Looguma talo gelin sida inuu yahay mid talo sharci ku siinaya.

Haddii aad qabto su’aalo ku saabsan dardaaranka hore ee uusan buuggan yar ka jawaabi karin, fadlan wac Isbitaalka Inova kadibna waydii telefoon lambarka waaxda maaraynta kiiska si aad ula hadasho shaqaalaha bulshada (social worker) ama waaxda matasha bukaanka si aad u hesho talo dheeraad ah iyo ilo kale oo akhbaaraad ah.

Uma baahnid qareen kuu diyaariya dokumentiga dardaaranka hore laakiin haddii aad doonaysid inaad la hadasho qareen waxaad la xiriiri kartaa ururka qareenada ee degaanka si laguugu soo gudbiyo. Waxaad ka ogaan kartaa ururka qareenada xaafadaada internetka ama buugaaga lambarada telefoonada.

Dardaaranka hore waa dokumentiga sharxaya xulashada xanaanada-caafimaadka. Dokumentiga waxuu u adeegayaa sidii mid haga dhakhaatiirta, bixiyeyaasha xanaanada-caafimaadka, masuuliyiinta, Awooda Dhaxal-galka Qareenka ee Go’aanada Caafimaadka (Durable Power of Attorneys for Healthcare Decisions) (DPOA), xubnaha qoyska, iyo dadka kale ee ka walaacsan samaynta go’aanada xanaanada caafimaadka ee dadka waawayn ee ay maskaxdii ka tagtay (incapacitated adults). Dokumentiga waxuu ka kooban yahay shan qaybood: ballanta Awooda Dhaxal-galka Qareenka ee Go’aanada Caafimaadka (DPOA), awoodaha aad siiso qofkaaga DPOA-ga, amarrada xanaanada caafimaadka, Amarrada Marka Nafta La joojinayo, iyo dardaaranka bixinta xubnahaaga, nudayaashaada, ama jirkaaga kadib marka aad dhimato. Akhbaar dheeraad ah ee nooc walba oo dardaaranadan ka mid ah waxaa dib laguugu siin doonaa buuggan gudahiisa.

Fadlan kala xaajood waxyaalaha ka midka ah dardaarankaaga hore qoyskaaga iyo dhakhtaradaada. Waxaad uga hadli kartaa wada xaajoodka waxyaalaha ku saabsan mabda’a aad rabto in la tixgeliyo ama la sharfo marka la samaynayo go’aanada xanaanada caafimaadkaaga haddii ay dhacdo inaad mar gasho jirro sii xumaatay ama aan wax ka qabad lahayn taasoo kaa dhigta qof aan awood u lahayn inuu soo gudbiyo

go’aanadiisa. Mabaadii’dan waa waxa aad u tixgeliso inay yihiin waxyaalaha kuugu muhiimsan ee qeexitaankaaga “tayada nolosha”. Waxaad iyagana dadka ka doonaysaa inay tixgeliyaan sida ay u samaynayaan go’aanada ku saabsan xanaanada caafimaadkaaga kuwaasoo saamaynaya guud ahaan tayada nolosha. Marka aad kala xaajooto dardaarankaaga hore qoyskaaga iyo dhakhtarkaaga, sii nuqulada foomka ama foomamka dardaaranka hore dhammaan dhakhtaradaada si ay ugu daraan diiwaanka caafimaadkaaga ee xafiiskooda. Dhakhtarkaaga waxa uu leeyahay go’aan la xiriira inuu daba galo Dardaaranada Hore haddii isaga ama iyada uu qabo ama ay qabto hor-istaag xagga sharafka (moral) ama caafimaadka (clinical) ee xulashooyinka caafimaadkaaga. Haddii dhakhtakaaga uu dareemo ama ay dareento inuusan/inyasan ka soo bixi karin go’aanadaada xanaanada caafimaadka, isaga ama iyada wuu kula shaqayn doonaa ama kula shaqayn doontaa si xanaanadaada loogu gudbiyo dhakhtar kale kaasoo raaci doona dardaarankaaga.

Sidee ayaan u isticmaalaa xaquuqahayga xanaanada-caafimaadka?
Iyadoo la hoos imaanayo xeerka Virginia, “[q]of walba oo bani’aadam ah oo da’ wayn ku jira lehna maskax caafimaad qabta waxuu xaq u leeyahay inuu go’aansado waxa laga samayn doona jirkiisa.” Dhakhaatiirtu waxay ka caawiyaan bukaankooda inay isticmaalaan xaquuqdan iyagoo siinaya akhbaarta ku saabsan daawaynta caafimaad ee ay kula talinayaan isla markaana ugu qeexaya fursadaha xanaanadadooda. Marka uu bukaanku ku raaco talooyinka daawaynta, waxay siiyeen ogaysiintooda ogolaansho. Bukaanku waxuu kaloo xaq u leeyahay inuu diido talooyinka daawaynta loo soo jeediyay.

Noocyadee go’aanno ah ayaa ku jira dardaaranka horey loo sheegay?
Xeerka Go’aanada Xanaanada-caafimaadka ee Virginia waxuu kuu ogolaanayaa inaad u samaysid go’aanada xanaanada-caafimaadka seddex hab:

1. Waxaad sharxi kartaa nooca daawaynta aad u rabto dhibaatooyinka caafimaadka ee jirka ama maskaxda haddii ay dhacdo inaadan awood u yeelan inaad ka qayb qaadato go’aan samaynta iyo nooca daawaynta aad rabto haddii aad noqoto mid ay hayso jirro aan waxba laga qaban karin isla markaana aadan samayn karin go’aanno ku saabsan xanaanadaada.
2. Waxaad magacaabi kartaa Awooda Dhaxal-galka Qareenka ee Go’aanada Caafimaadka (DPOA) oo ah qof sharci ahaan awood u leh inuu adiga go’aanno kuu sameeyo markii aadan nafsadaada u samayn karin — iyadoo aan loo eegayn xaaladaada ama jirradaada. Ma aha inaad noqoto mid ay hayso jirro aan waxba laga qaban karin in qofka DPOA-ga uu raaco dardaarankaaga. Waxaad u xuli kartaa tiro awoodo ah qofka DPOA-ga ah ee la xiriira go’aanada adiga laguu samaynayo.

3. Waad samayn kartaa go’aanno ku saabsan waxii lagu samayn lahaa xubnaha jirkaaga, nudahaaga iyo jirkaaga kadib marka aad dhimato

Qaybahan foomka dardaaranka hore waxaa lagu sharxayaa su’aalahan soo socda.

Waa maxay Amarrada Xanaanada Caafimaadka?

Amarrada Xanaanada Caafimaadka waxay faahfaahiyaan nooca daawaynta aad doonayso adiga ama aadan doonayn haddii aadan awood u lahayn inaad ka qayb qaadato samaynta go’aanada nafsadaada taasoo ay ugu wacan tahay xaalad jireed ama maskaxeed. Foomka waxuu ku siinayaa boos aad adiga gelinayso dardaaranadaada gaarka ah. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad kala xaajooto amarradan qofkaaga DPOA-ga ah iyo dhakhtarkaaga si aad u hubiso inay fahmeen waxaad doonayso. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad dhamaystirto qaybtan si aad uga dhigto dokumentiga mid jira oo sharci ah.

Waa maxay Amarrada Marka Nafta La joojinayo?

Amarrada Marka Nafta La joojinayo waxay faahfaahinayaan sidii adiga laguu xanaanayn lahaa haddii ay mar dhacdo inaad qabto jirro aan waxba laga qaban karin isla markaaana aadan awood u lahayn inaad go’aanno nafsadaada u samayso. Dokumentiga waxuu sheegayaa inaadan u baahnayn Dib-u-soo kicinta Wadnaha iyo sambabka (CPR), in lagu geliyo mashiinka lagu neefsado, ama lagu siiyo nafaqayn aan dhab ahayn iyo biyo-siin. Waxaad kaloo ku dari kartaa daawayn kale sida kolka wasaqda jirka ama kilyaha laga saarayo (kidney dialysis). Waa muhiim inaad dib ula eegto dhakhtarkaaga fursadahaaga aad ku diyaarinayso amarradan. Xaalad aan waxba laga qaban karin waa xaalad aan la daawayn karin ee dhimasho la filayo lix bilood gudahood haddii uu cudurku maro waddadiisa caadiga ah. “Aan wax ka qabasho lahayn” waxay sidoo kale la macno tahay xaalad joogto ah oo aanad waxba kala garanayn (vegetative state), taasoo ay dadka qaarkiis ugu yeeraan kooma joogto ah, xitaa marka aan dhimasho laga baqayn. Kiiskii ay noqotaba, dhakhtar ayaa go’aamiyay inysan jirin xaalad daawayn ee la filayo in lagu soo kabsado.

Saxiixida dardaarankan hore waxay ogolaanaysaa inaad si hore u go’aansato haddii aad rabto in ay dhakhaatiirtu ku siiyaan adiga waxa uu sharcigu ugu yeero “hababka nolol-dheeraynta (life-prolonging procedures).” Xasuuso amarrada marka nafta la joojinayo waxay keliya oo ku khusaysaa markii aadan ka qayb qaadan karin samaynta go’aanada. Haddii kale dhakhtarkaaga ayaa adiga toos kaagala xaajoon doona go’aannadan.

Waa maxay “hababka nolol-dheeraynta?”

Kuwani waa daawooyin aanan la filayn inay daaweeyaan xaalad aan waxba laga qaban karin ama kaa dhigaan mid inta ka roonaada. Waxay keliya oo ay dheereeyaan habka dhimashada. Daawayntan waxaa ka mid noqon kara biyeen (biyo siin) iyo nafaqo (raashin siin) lagu samaynayo tuubo, ku xiritaanka mashiino kuu neefsada adiga iyo

noocyo kale ee daawayn ama qalliin sida qashin ka saarista kilyaha. Hababka nolol-dheeraynta *kuma jiraan* daawaynta loogu baahan yahay inaad hesho niyad-dejin ama xanuunka lagaaga yareeyo. Dhakhtarkaaga waxuu mar walba ku siinayaa daawayn ama daawooyin xanuunka kaa yareeya ama kaa dhiga kuwo ku niyad-dejiya aan ka ahayn marka aad ku tiraahdo dardaaranka hore inaadan doonayn iyaga. Waxaad sidoo kale noocan dardaaranka hore ku dhihi kartaa inaad doonayso inaad hesho hababka nolol-dheerayn ee gaar ah ee adiga lagu siiyo. Tusaale ahaan, haddii aad doonayso in dhammaan hababka nolol-dheeraynta laguu sameeyo marka laga reebo in lagaa bixiyo tuubada quudashada, waad ku sheegi kartaa sidaa dardaaranka hore loo sheegay.

Qofkaaga DPOA-ga waxaa la waydiin karaa go'aanno is-daba taxan marka qorshaha xanaanadaada uu sii socdo. Tani waxay hoosta ka xarriiqaysaa muhiimadda kala xaajoonta daawayntaada iyo xulashada xanaanadaada ee qofkaaga DPOA-ga ah kaasoo lagu waajib yeelay inuu raaco dardaarankaaga. Dhakhtarkaaga waxuu kula eegi doonaa fursadahagaa adiga ama qofka aad magacowday marka ay xaaladahaaga sii socdaan. Tani waxaa ku jiri kara go'aanada joojinta hababka "nolol-dheeraynta" ama daawaynta. Sida dhammaan go'aanada daawaynta caafimaadka, waad diidi kartaa inaad sii waddo ama qaadato daawooyinkan waqtigii la doono inta lagu jiro xanaanadaada.

Haddii aan dhinto maxaa yeelay waxaan diiday daawaynta nolol-dheeraynta iyadoo la hoos imaanayo Xeerka Go'aanada Xanaanada-caafimaadka, dhimashadayda miyaa loo tixgelinayaa inay tahay mid is-dil ah?
Maya. Xeerka Go'aanada Xanaanada-caafimaadka waxuu si gaar ah u leeyahay, haddii la raaco bukaankana uu dhinto, dhimashadaas ma aha is-dil. Marka la raaco xeerka ma aha inay baabi'inayso heshiiska caymiska nolosha haddii xitaa uu heshiiska si kale dhigayo ama leeyahay.

Waa maxay Awooda Dhaxal-galka Qareenka ee Go'aanada Caafimaadka?
Awooda Dhaxal-galka Qareenka ee Go'aanada Caafimaadka (DPOA) waa qayb kale ee ka mid ah foomka dardaaranka hore. DPOA-ga waa qofka aad u magacawday inuu kuu sameeyo go'aanadaada xanaanada-caafimaadka adiga marka aadan shakhsi ahaan uga qayb qaadan karin samaynta go'aanadaas iyadoo ay ugu wacan tahay jirro xagga jirka ama maskaxda ah. Foomka Dardaaranka Hore (ee la socda buuggan yar) waxuu qorayaa liiska awoodaha qofka DPOA-ga ah. Waad ka tiri kartaa liiska waxii awoodo ah ee aadan doonayn inaad siiso qofkaaga DPOA-ga ah. Qofka lagu magacaabay noocan dardaaranka hore waxuu samayn karaa dhammaan go'aanada xanaanada-caafimaadka ee aad u samayn lahayd nafsadaada haddii aad awoodo, haddii aad qabto ama aadan qabin jirro aan waxba laga qaban karin. Sharciga Virginia waxuu leeyahay qof aad dooratay inuusan samayn karin go'aanno caksi ama liddi ku ah waxa aad rumaysan tahay diin ahaan, mabda'yadaadada aasaaska ah iyo xulashooyinka aad sheegtay.

Sidee ayaan u samayn karaa in la ogaado go'aanadayda ku saabsan bixinta xubnahayga, nudayaashayda, ama jirkayga kadib marka aad dhimato?
Nooca shanaad ee dardaaranka waxa uu kuu ogolaanayaa inaad magacawdo qofka kuu ilaalinaya fulinta ama meelmarinta dardaarankaaga aad sheegtay ee xubnahaaga, nudayaashaada, ama jirkaaga in la bixiyo kadib marka aad dhimato. Haddii aad su'aalo ka qabto noocyada bixintan, waxaad kala xiriiri kartaa Mujtamaca Gobolka Washington ee Xubno-gelinta (Washington Regional Transplant Community) lambarka 703-641-0100. Sharci ahaan, qofkaaga DPOA-ga waa inuu raaca dardaarankaaga ku saabsan bixitaanka xubnahan.

Miyaa la raacayaa dardaaranka aan hore haddii ay timaado xaalad degdeg ah ee aanan ku muujin karin dardaarankayga?
Shaqaalaha caafimaadka ee xaalada degdegga ah, sida kooxaha samatabixinta ama kooxda ambalaaska, sharci ahaan ma fulin karaan dardaarankaaga ku jira dardaaranka hore haddii loo yeero inay wax ka caawiyaan marka xaalad degdeg ah lagu jiro. Sidoo kale, adeeg bixiyeyaasha qolka xaalada degdegga ah ee isbitaalka iyagana ma ogaan karaan dardaarankaaga marka lagu jiro xaalad degdeg ah. Laakiin haddii aad qabto jirro aan waxba laga qaban karin ama jirro aad u xun, xaaladaha qaarkood waxaad horey u sii samayn kartaa go'aanno inaad diiddo nooc ka mid ah xanaanada caafimaadka ee xaalada degdegga ah = dib-u-soo kicinta haddii uu wadnahaagu joojiyo garaaca ama aad joojiso neefsashada.Waxaad sidan samayn kartaa marka uu dhakhtarkaaga adiga kuu dhamaystiro "Amarka Dhaxal-galka ah ee Inaan Dib-laguu kicin karin" "Durable Do Not Resuscitate Order" (oo inta badan loogu yeero "Amarka Dhaxal-galka ah DNR") kadibna uu gobolku ansaxiyo. Dhakhtarkaaga waxuu sidoo kale u qori karaa isbitaalka amarka Ha isku Dayina Dib-u-soo kicin/Ogolaada Dhimasho Dabiici ah (DNAR/AND) in la raaco isbitaalka gudahiisa ama guriga xanaanada/xarunta xanaanada ee muddada dheer. Amarkan waa mid jira oo sharci ah illaa iyo inta aad adiga dib uga noqoto — taasoo ah, marka aad awoodo samaynta go'aanno aad wax uga bedalayso fikirkaagii kadibna aad u sheegto dhakhtarkaaga inaad doonayso in dib-laguu kiciyo. Qofkaaga DPOA-ga ah ma uu bedeli karo ama kama uu noqon karo go'aankaaga DDNR.

Dardaaranka hore miyay tahay inuu qoraal ahaado?
Maya laakiin waxaa jira xaalado gaar oo sidaas ogolaanaya. Xeerka Go'aanada Xanaanada-caafimaadka waxuu u oggol yahay dadka qaba jirro aan waxba laga qaban karin ee aan waligood dardaaran hore saxiixin inay sameeyaan dardaaran hore oo af ama hadal ah. Waa inay yiraahdaan waxay rabaan, ama ay magacaabaan qof iyaga u sameeya go'aanada, iyadoo lala joogo dhakhtarka u adeegaya ama labo qof oo marqaati ah. Dhakhtarka ayaa kadib ku diiwaangelinaya waxyaalaha ku jira dardaarankan hore ee hadalka ah rikoorka caafimaadka isla markaana ku qeexaya meesha marqaatiyaasha.

Miyaan u baahanahay dardaaranka hore?
Maya. Dardaaran hore keliya waa hal hab oo aad ku hubinayso dhakhtaradaada iyo dadkaaga ku jecel inay ku ogaanayaan nooca xanaanada-caafimaadka aad rabto gaar ahaan haddii ay dhacdo xilli aadan iyaga waxba u sheegi karin. Waxaad haysan kartaa keliya hal, labo, ama seddex nooc oo dardaaranno hore ah. Sharcigu waxuu u baahan yahay in bixiyeyaasha xanaanada-caafimaadka aysan daka ku faquuqi karin (discriminate) wax ku salaysan inuu qofku leeyahay ama uusan lahayn dardaaran hore.

Maxaa dhacaya haddii aanan go'aanno samayn karin isla markaana aanan lahayn dardaaran hore?
Sharciga Virginia waxuu qoraa liiska dadka sida kuwa masuulka kaa ah ama xubnaha qoyskaaga inay yihiin dad laga yaabo inay kuu samayn karaan go'aanno ku saabsan xaaladaada caafimaad xitaa haddii aadan lahayn dardaaran hore. Gudaha Virginia, heerarka go'aan samaynta waa koow, masuuliyiinta sharciga ah, kadib qofkaaga DPOA-ga ee Go'aanada Xanaanada caafimaadka, ninka ama marwada, caruurta iyo ugu dambayn, qaraabada kale ee la heli karo. Haddii uusan qofna liiska kuugu jirin si uu go'aan kuugu sameeyo, xaakim ayaa kuu go'aamin kara daawaynta kuugu fiican. Dadka nolosha kula qaybsada iyo saaxiibada xaq uma laha inay go'aanno u sameeyaan bukaanka aan ka ahayn marka horay loogu sii magacaabay dardaaranka hore sida inay yihiin awooda dhaxal-galka qareenka ee go'aanada caafimaadka.

Miyaan u baahanahay qareen iga caawiya sidii aan u samayn lahaa dardaaran hore?
Maya. Qareen waa caawimaad, laakiin uma baahnid inaad haysato qareen kuu diyaariya noocii aad doonto ee dardaaranada hore. Xaqiiqdii, Xeerka Go'aanada Xanaanada-caafimaadka waxuu kuu soo bandhigayaa foom aad isticmaali karto kaasoo ku jira buuggan yar. Dokumentigu uma baahna in la geeyo nootaayo laakiin waa inay marqaati ka yihiin laba qofood oo ay da'doodu ka wayn tahay 18. Marqaatiyaasha waxaa xaqiijinaya saxiixooda inay kuu saxiixeen dokumentiga, laakiin marqaatigu ma xaqiijinayo jiritaanka ama sharci ahaanta waxa ku qoran dardaaranka. Waxaa laguula talinayaa inuusan qofkood labada marqaati uusan kuu noqon qofka aad u magacowday inuu kuu noqdo DPOA-ga, si la isaga ilaaliyo dareen is-khilaafsan (conflict of interest).

Waa sidee haddii aan bedelo fikirkayga kadib marka aan saxiixo dardaaranka hore?
Waad ka noqon kartaat. Haddii aad doonayso, waxaad samayn kartaa mid cusub. Haddii aad tahay bukaan ama qof deggan xarumaha xanaanada-caafimaadka, u sheeg dhakhtarkaaga ama kalaalisada caafimaad inaad doonayso inaad ka noqoto ama bedesho dardaarankaagii hore. Waxaa aad u fiican inaad jeexjeexdo ama baabi'iso dhammaan

nuquladii dardaarankii hore si aad isaga ilaaliso wax ku wareerin kara waqti laga yaabo inaad ku jirto xaalad murugsan ee ku saabsan go'aanadii loo samayn lahaa xanaanadaada iyo sidii loo samayn lahaa iyo qofkii samayn lahaa.

Sidee dhakhtarkayga (dhakhtaradayda) u ogaan karaa inaan leeyahay dardaaran hore?

Marka isbitaalka lagu seexiyo, isbitaalada iyo xarumaha kale ee xanaanada-caafimaadka waa inay qofka bukaanka ama meesha deggan ay waydiiyaan inay leeyihiin dardaaran hore, haddii ay leeyihiin, waa in nuqul dardaaranka ah la ag dhigaa rikoorka caafimaad ee bukaanka ama qofka meesha deggan. Sidii ay noqotaba, waa inaad siisaa nuqullo dardaarankaaga hore ah qoyskaaga ama dhakhtarkaaga, iyo qofkii kale ee aad u malayso inuu u baahan yahay inuu ogaado nooca daawaynta caafimaad ee aad rabto ama aadan rabin. Laakiin xasuuso, sidoo kale, inaad siiso qof walba oo dadkan ka mid ah nuquladaadii ugu dambeeyay haddii aad wax ka bedeshay dardaaranadaadii hore.

Ogaysiis ku socda Bixiyeyaasha Xanaanada Caafimaadka:

Anigoo ah, _____, waxaan halkan ku ansaxiyey dardaaran hore ee caafimaad waxaana siiyay nuqul dardaarankan ah:

_____

Magac Telefoon

_____

Cinawaan

_____

Magac Telefoon

_____

Cinawaan

Saxiix _____

Taariikh_____

Waaxda Caafimaadka ee Virginia (Virginia Department of Health) iyo Waaxda Caafimaadka ee Gabowga (Virginia Department for the Aging) waxay ansaxiyeen oo ogolaadeen buuggan yar in la qaybiyo iyadoo la hoos imaanayo sharuudaha xeerka federaalka ah.
(Revised 7/98; current 3/06, Revised IHS 3/08)